# Talaalada Dhalaanka ee Hargabka iyo COVID-19

Waxa Waalidiinta/Mas'uuliyiinta Looga baahan yahay Inay ogaadaan

## Talaalada COVID-19 iyo hargabka waxaa loogu tala galay caruurta da'doodu tahay 6 bilood iyo wixii kasii weyn.

### Maxay tahay sababta loogu baahan yahay in caruurta la talaalo?

Gudaha Maraykanka, hargabku waa kan koowaad ee sababa dhimashada ka dhalata cudurada talaalka looga hortagi karo. In ka badan 15 milyan oo caruurta Maraykanka ah ayaa qaadday COVID-19. Caruurta ka yar da'da 6-da bilood ma awoodaan in laga talaalo COVID-19 iyo hargabka, sidaa darteed waxaa muhiim ah in la talaalo dhammaanba dadka ka agdhow. Xaata caruurta caafimaadka qabta waxay aad ula xanuunsan karaan COVID-19 iyo hargabka waxayna ku faafin karaan dadka kale kahor inta aadan ogaan inay xanuunsan yihiin.

Talaaladaanu waxay gacan ka gaystaan sidii la iskaga difaaci lahaa xanuunada daran, isbitaal dhigista iyo dhimashada ka dhalanaysa COVID-19 iyo hargabka. **Talaalada COVID-19 iyo hargabka iskumar ayaa la qaadan karaa**, maslaxadaada, iyo difaacaaga ugu wanaagsan ee aad uga hortagayso cuduradaan dartood.

### Sidee ayaan canuggayga u talaali karaa?

Gobolka Washington wuxuu dhammaan talaalada loogu tala garay caruurta ilaa da'da 18 sano jirka ku siiyaa si bilaash ah. Weydii dhakhtarka canuggaaga ama goobtaada caafimaadka inay baxshaan talaalada COVID-19 iyo hargabka.

Qoysaska aan horey u lahayn adeeg bixiye daryeel caafimaad waxay ka wici karaan **Khadhka Washington ee Help Me Grow (I caawi) ee 1-800-322-2588** ama waxay bookhan karaan **ParentHelp123.org** si ay u helaan adeeg bixiye daryeel caafimaad, goob caafimaad, ama adeegyo caafimaad. Adeeggaanu waa bilaash waxaadna heli kartaa kaalmo dhanka luuqadda ah.

Waxaad sidoo kale bookhan kartaa **Vaccines.gov** waxaadna ka arki kartaa liiska goobaha kuu dhow ee laga helo talaalada COVID-19 iyo hargabka kuwaas oo sidoo kale caruurta talaala.

## Imisa kuuro ayuu canuggaygu u baahan yahay?

## Hargabka:

- Haddii ilmahaaga ama canuggaaga ka yar 8 sanno uu qaadanayo talaalkiisa hargabka ee ugu horeeya, wuxuu u baahan yahay **2 kuuro** oo la siinayo ayadoo **1 bil u dhexayso**.
- Kaliya **1 kuuro** ayuu u baahan yahay qofka horey usoo qaatay talaalka hargabka.

**COVID-19:**

- Carruurta da'doodu tahay **6 bilood- 4 sano** jir waxay qaadanayaan 3 kuuro oo taxanaha tallaalka Pfizer ah ama taxanaha 2-da kuuro ah ee tallaalka Moderna
- Carruurta da'doodu tahay **5 sano jir iyo wixii ka weyn** waxay qaadanayaan hal kuuro oo ah tallaalka Pfizer ama Moderna

  Carruurta da'doodu tahay 6 bilood iyo wixii kasii weyn kuwaas oo habdhiska difaaca jirkooda uu si dhexdhexaad ah ama si daran daciif u yahay waa inay qaataan taxane 3 kuuro ah waxaana laga yaabaa inay qaataan qiyaaso dheeraad ah ugu yaraan 2 bilood kadib markii ay qaateen qiyaastoodii ugu dambeeysay.

*Weydii adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ikhtiyaarada talaalada COVID-19 iyo hargabka ee aad heli karto iyo xulashada idiinku wanaagsan adiga iyo qoyskaaga.*



**Wixii su'aalaha oo ku saabsan talaalka COVID-19:**

**Bookho: VaccinateWA.org/kids**

**Wac: 1-833-Khadka Wicitaanka-Talaalka** (1-833-829-4357), **Press #**

Caawimaada luuqadda ayaa kuu diyaar ah.

flu free WASHINGTON

Vaccinate WA

CovidVaccineWA.org

# SU'AALAHA INTA BADAN LA ISWEYDIIYO: TALAALADA COVID-19 IYO HARGABKA

## Canuggaygu ma u baahan yahay talaal buuxa haddii horey loo talaalay?

Haa. Talaalada hargabka iyo COVID-19 waa la casriyeeyaa si ay u waafaqaan xanuunada la filaayo inay yimaadaan xiliga ay dhacaan xanuunada neefmareenka ee soo socda. Ayada oo talaaladu yihiin kuwo wax tar leh, haddana waxaa la ogyahay in difaacoodu hoos u dhaco markii mudoo la joogo. La socoshada xaaladaha ku saabsan tallaalada ayaa ah habka ugu waxtarka badan ee lagu sii wadi karo difaaca ka dhanka ah cuduradaan. Waxay qaadanaysaa ilaa 2 todobaad kaddib talaalka in qofku difaac helo.

## Talaaladu ma yihiin kuwo aan dhibaato u keenayn canuggayga?

Haa, talaalada COVID-19 iyo hargabku waxaa la rumaysan yahay inay ammaan u yihiin caruurta. Ma jiraan waxyeelo halis ah oo lagu arkay tijaabooyinka caafimaad ee tallaalka COVID-19 ee dhalinyarada. Talaalka hargabka waxaa si nabadgalyo ah loo isticmaalayay ilaa iyo 70 sanno. Talaalka waa la tijaabiyaa si joogto ah ayaana loola socdaa badbaadadiisa iyo waxtarkiisa. Waxyeelada waaweyn ee uu gaysan karo waa dhif iyo naadir. Talaalada COVID-19 iyo hargabka waxaa lagula talinayaa qof walba oo 6 bilood jir ah ama kasii weyn.

## Waa maxay dhibaatooyinka isticmaalka ugu badan ee ay talaaladaanu ku leeyihiin caruurta?

Saamaynta ugu badan waa gacanta oo nabar yeelata, daal, madax xanuun, iyo murqo xanuun. Saamaynadu inta badan waa kuwo fudud ama dhedhexaad ah marka heerkooda la eego waxayna yimaadaan 2 maalmood gudahood kaddib marka lagu talaalo, waxayna sida caadiga ah baxaan 1 ilaa 2 maalmood. Caddaymo ayaa muujinaya xiriirka ka dhexeeya talaalada COVID-19 iyo myocarditis/pericarditis (infekshinka ku daca wadnaha); si kastaba ha ahaatee, arintaani waa mid dhif iyo naadir ah waxaana inta badan sababa caabuqa COVID-19.

Khataraha caafimaadku haddii caruurta ay ku dhacaan COVID-19 iyo/ama hargabku waa ay ka badan tahay khatarta waxyeelada talaalka. Waxyeeladu waxay calaamad u yihiin in talaalku(talaaladu) shaqaynayaan; talaalada COVID-19 iyo hargabka midkoodna ma sababo xanuun.

## Maxaa caruurta looga baahan yahay si loo keeno balantooda?

Xaaladaha intooda badan, waalidiinta iyo mas'uuliyiinta waxaa laga doonayaa inay bixiyaan ogolaanshaha in la talaalo qofka da'diisu ka yartahay 18 sanno. Weydii goobta talaalka waxaa lagaaga baahan yahay inaad aqbasho. Xaqiiji inaad sidoo kale sheegto haddii canuggaagu qabo baahiyo gaar ah marka aad balanta u qabanayso. Waxaa sidoo kale ku caawin karta inaad diyaarsato agabyada ciyaarta ee canuggaaga sida boombalaha ama xayawaanka gacan ku samayska ah.

## Waxaan qabaa su'aalo dheeraad ah. Halkee ayaan bookhan karaa?

Ka hel jawaabaha su'aalaha dheeraadka ah adiga oo booqanaya **VaccinateWA.org/kids**. Waxaad sidoo kale la hadli kartaa adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ee aad aaminsan tahay.

Washington State Department of HEALTH

**DOH 820-249 December 2023 Somali**

Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-525-0127. Haddii aad tahay macmiil dhagool ah ama aad maqal culus tahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir doh.information@doh.wa.gov.